FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 18-aad. Garowe . 25Agoosto 2016. Lam.8

Faafinta bil walba soo baxda جريدة الشهرية

*Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland*

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Xeerka Heer tayeedka iyo dhawrida tayada Badeecadaha Puntland.**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

**Waxba ma leh**

*Sharci Lr. 1. 25/8/2016, kuna saabsan Sharciga Heer tayeedka iyo dhowrida tayada Badeecadaha Puntland.*

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr.1. ee 24 Agoosto 2016, kuna saabsan sharciga Heer tayeedka iyo dhowrida tayada Badeecadaha puntland.**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/52/ 2016 ee 15/8/2016;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Heer tayeedka iyo dhowrida tayada Badeecadaha Puntland;

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr. Cabdiweli Maxamad Cali Gaas.**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**

**Office of the Speaker**

***Ref:-XGGW/DPL/ 52 /2016*** **Isniin, Garoowe** **Date:- 15/08/2016**

**Ku:- Madaxweynaha DPL**

**Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixinta Xeerka Heer Tayeedka iyo Dhowrida Tayada Badeccaha Puntland**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL Qodobadiisa **64-aad** |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweynaha DPL **MW/DPS/735/2015** ee **Dec 06-2015** kuna saabsanayd Xeerka Dhowrista Tayada Badeecadaha Puntland. |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Dhowrista Tayada Badeecadaha Puntland. |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku Ansixiyey kalfadhigii 37-aad fadhigii 15-aad ee **28/07/2016.** Xeerka Heer Tayeedka iyo Dhowrida Tayada Badeecaha Puntland |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Xeerka Heer Tayeedka iyo Dhowrida Tayada Badeecaha Puntland**

**Allaa Mahad Leh**

**Md. Axmed Cali Xaashi**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL**

# XEERKA HEER TAYEEDKA IYO DHOWRIDA TAYADA BADEECADAHA EE PUNTLAND

## *(Puntland Standarization and Quality Control Act).*

### QAYBTA KOWAAD
### TILMAAMAHA GUUD
### XUBINTA 1AAD

**Qodobka 1aad:**
**Magaca Xeerka**

Xeerkan waxa loogu yeerayaa Xeerka Heer tayeedka iyo Dhowridda Tayada badeecadaha ee Puntland (Puntland standarization and Quality Control Act).

**Qoddobka 2aad**
**Erey-bixin**

Hadii aan si kale nuxurku u sheegin, erayada waxa loola jeedaa:
**Tayo:** Waxaa loola jeedaa waxtarka iyo fayo qabka shay ama badeecadaha.
**Agabka:** Waxaa loola jeedaa dhamaaan badeecadaha kala duwan ee laga soo saaro ama yimaada dalka iyadoo dibadda laga keenayo.
**Anfaaci:** Waxaa loola jeeda wax kasta oo la quuto.
**Dhawrida:** Waxaa loola jeedaa ilaalinta Heerka,tayo wanaaga dhamaan Badeecadaha dalka Soo gelaya ama ka dhoofaya.
**Guddi:** Waxa loola jeedaa Gudigga Dhawridda Tayada.
**Magac-dhawga Xeerka:** Magac-dhawga Xeerkan Waa Xeerka Heer Tayeedka iyo Dhowrista Tayada badeecadaha ee Puntland .
**Fasiraad:** Wixii aanu Xeerkani si cad u qeexin, waxaa loo fasirayaa si waafaqsan shareecada diinta islaamka, Dastuurka dalka iyo xeerarka kale ee la xiriira xeerkan iyo hadii loo baahdo Xeerarka Caalamiga ah.

**Ogolaanshaha:** waxa loo la jeedaa ogolaanshaha ay waaxda tayo-dhawrku aqoonsi rasmi ah ku siinayso shakhsiyadda qaanuuneed ee gudashada hawlgalka goob cayiman ee sugidda tayada.
**Shahaadayn:** waxa loo la jeedaa qoraal dhinac saddexaad oo ku salaysan go'aamo ay la socdaan dib u eegista, wax soo saarkaas, habkaa iyo hannaanka ama alaabta buuxiyay shuruudaha gaarka ah.
**Xeerka lagu dhaqayo:** waxa loo la jeedaa shuruuc wada socota oo la xiriira tubta lagu dabaqayo, ama habka lagula qabatimayo isku xirka dhismaha, rakibaada, baaritaanka, muunadda, ama Aalad.
**Dhoofin:** waxa loo la jeedaa tirade agabka loo qaadayo ama laga keenayo Puntland.
**Kontaynar:** waxa loo la jeedaa gal ka samaysan biro oo lagu qaado alaabada si bed qabkooda loo sugo
**Agab:** waxa loo la jeedaa shay kasta oo laga ganacsanayo.

**Waaxda:** waxa loola jeedaa xubnaha waaxda Dhowridda Tayada Puntland mas'uulna ka ah dhamaan awoodaha uu xeerkani tilmaamayo;
**Hay'ad:** waxa loo la jeedaa waaxda Dhowrista Tayada sida ku xusan qaybta 11.
**Been abuurad:** waxa loo la jeedaa alaab kuwaas oo laga been sheegay asalkooda.
**Dokumenti:** waxa loo la jeedaa xog kasta, xiriir kasta, ama xaqaa'iq kasta oo la kaydiyo.
**Soo dejin:** waxa loo la jeedaa agab kasta oo dalka la keeno ujeeddo kasta ha loo keeno.
**Kormeere:** waxa loo la jeedaa shaqaale ka tirsan waaxda oo qoraal ogolaansho ah ka sita Agaasimaha waaxda, si ay u gutaan waajibaadkooda shaqo, una dabaqaan qodobada xeerkan.
**Baaris:** waxa loo la jeedaa baaritaanka agabka, habaynta ama rakibaadda iyo go'aaminta raacista shuruudahii gaarka ahaa ee laga rabay in ay raacday.
**Joojin:** waxa loo la jeedaa diidmada ama ilaalinta agabka la soo dejiyo ee ku dhaca in uu buuxiyo heerar tayeedka iyo shuruucda looga baahan yahay.
**Heer tayeedka caalamiga ah:** waxa loo la jeedaa heer tayeedka kasta oo ka soo baxa ISO, IEC, FAO, iyo isu tagga heer-tayeedka la aqoonsan yahay ee caalamiga ah.
**Agaasimaha:** Waxa loola jeeda Agaasimaha waaxda Dhowridda Tayada badeecadaha Dawladda Puntland oo ah Hay'adda uu xeerkani abuurayo,
**Heer-tayeedka Qaranka:** waxa loo jeedaa heer tayeed kasta oo la soo saaray oo ku salaysan xeerka qodobkiisa *35*.
**Warshad:** waxa loo la jeedaa soo saaris, ururin, bedelid, habayn, keenid, rakibaad, tijaabo.
**Soo saare:** waxa loo la jeedaa qof kasta oo leh sharciyad qaanuuneed oo isku xiriir wax-soo saar habayn, daaweyn, rakibaab, tijaabin, ama hawlgal kasta oo la xidhiidha agab ama adeeg ku khasban Heer-tayeedka Qaranka ama shuruucda farsamo.
**Calaamad:** waxa loo la jeedaa tub kasta, calaamad kasta, summad kasta, magac, saxeex, xaraf ama lambar, ama wax kasta oo kale oo isu tagay oo la xiriira calaamad.
**Cabbiraad:** waa habka tijaabo ee lagu helayo mid ama ka badan qiimaha tiro taas oo suuragal ka dhigi karta tayada tirada.
**Adeeg:** waa adeeg kasta oo caadiyan loo qabto bixin, iyo codsiga ashkhaasta ka faa'iidaysanaysa adeega.
**Ogolaansho:** waa ogolaanshaha isticmaalka calaamada heer-tayeedka ee ku xusan xeerkan.
**Dhisid:** waxa loo la jeedaa dhisme kasta ama hab kasta, oo ay ku jiraan dhismayaasha, diyaaradaha, Gaadiidka, iyo Maraakiibta.
**Wax soo saar:** waxa loo la jeedaa agab loo habeeyay in la suuq geeyo.
**Qiimayn tayeed:** waxa loo la jeedaa wax-qabadyo isku xiriirsan oo lagu sugayo tayada, diiradana lagu saarayo ku qanaca buuxinta tayada laga rabo.
**Iibin:** waa kala bedelasho , is dhaafsi, iyo badhigid ama guddoonsiin iib.
**Qeexnaan sugan:** waxa loo la jeedaa caddaynta agabka, habaynta, ama tixraaca dabeecada adeega, xooganaanta tayada, waxyaabaha uu ka kooban yahay, tirada, cabbirka, miisaanka, heerka, waaridda, asalka, da'da, ama astaamaha kale.
**Heer tayeedka:** waxa looga jeedaa summad la xafiday oo lagu dabaqayo hannaanka caddaynta agabka ee tilmaamaya helitaanka kalsooni ku filan agabka, ama adeegga.
**Marag furka shahaadada:** waxa looga jeedaa shahaado ama ruqsad caddayn ah oo si rasmi ah loo bixiyay
**WTO:** waxa looga jeedaa Hay'adda Ganacsiga Aduunka.

## AASAASKA WAAXDA

### Qodobka 3aad:
### Aasaasidda Waaxda Dhawridda Tayada Badeecadaha

Xeerkan waxaa lagu dhisay waaxda Dhawridda Tayada badeecadaha oo ah waax qaran oo leh qofnimo qaanuuneed iyo shaambad u gaar ah, una madaxbanaan maamul ahaan iyo dhaqaale ahaanba siyaasad ahaana hoos tagta wasaarada ganacsiga iyo warshadaha. Xarunta waaxda waa caasimadda ganacsiga dawladda Puntland ee Bosaso, xafiisyana waxay ka furan kartaa gobolada iyo degmooyinka Dalka intiisa kale. Waaxdu waxay yeelanaysaa astaan u gaar ah oo ay go'aan ku soo saarto.

### Qodobka 4aad
### Magac dhawga Waaxda.

Magac waaxdu waxa uu noqonayaa waaxda Dhowridda Tayada badeecadaha ee wasaaradda ganacsiga iyo warshadaha Puntland (Puntland Quality Control Department).

### Qodobk 5-aad
### Mabaadii'da Guud

**Ujeeddooyinka waaxda:**- Ujeedooyinka waaxdaan loo aasaasay waa:

1. In la baaro, Lana hubiyo badeecadaha xambaarsan khataro iyo haliso waxyeelo u geysankara Dadka iyo dalka Puntland iyo noolaha kale oo dhan.
2. In la dejiyo halbeegyo lana hubiyo inaan laga hoosayn halbeegyadaas
3. In la xaqiijiyo si buuxdana loo hubiyo tayada dhamaan wixii laga ganacsado iyo wixii la soo saaro oo dadka iyo duunyaduba isticmaalaan
4. In la cadeeyo digniinaha luqadaha qalaad ee ku suntan agabka iyo anfaaciga iyo dhamaan badeecadaha keeni kara haliso caafimaad, dhaawac iyo dhimashooyinba.
5. In dadweynaha laga ilaaliyo halisaha la xiriira badeecadaha.
6. Tayaynta, abuurida iyo kor u qaadida heerka caafimaad ee wax-soo saarka wershadaha dalka iyo alaabooyinka soo dega, xoolaha iyo beeraha si loo ilaaliyo caafimaad ahaan iyo dhaqaale ahaanba shacabka iyo xoolaha Reer puntland.
7. Xadaynta heer aanay ka hoosayn Karin adeega iyo alaabooyinka soo degaya iyo kuwa dhoofaya (standardizations).
8. Hubinta iyo gaarsiinta baayacmushtarka heerka loo xadeeyey iyo fulinta sharciga loo dejiyey.
9. Talo-siinta macaamiisha, shacabka iyo qiimaynta badeecadaha dalka soo gala, kuwa dhoofaya iyo kuwa ka soo baxa wershadaha dalka, beeraha iyo xoolaha.
10. U kuur-gelida in baaritaan lagu sameeyo waxyeelooyinka ay sababaan alaabada dalka soo gala ama ka soo baxda warshadaha dalka.
11. Xaqiijinta iyo sugida fayoobida wax kasta oo dalka soo gelaya ama ka soo baxaya wershadaha dalka ama dalka debediisa loo dhoofinayo intaba.
12. Abuurida Shaybaar qaran (National Laboratory System) oo lagaga baxo dhibaatooyinka tayo xumo iyo caafimaad ee dalka, dadka iyo duunyadaba haysta.

## XUBINTA 2-AAD

### Qodobka 6-aad
### Qaab-dhismeedka waaxda

1. Qaab-dhismeedka waaxda Dhawridda Tayadu wuxuu ka kooban yahay:

   b)Agaasime waaxeed
   t)Madax- qaybeedyada warshadaha, daawada,cuntada,kalluunka,xoolaha, gaadiidka
   j)Madaxqaybeedka maamulka iyo lacagta
   x)Madax qaybeedka Shaybaarka
   kh)Xafiisyada gobolada iyo degmooyinka.

### Qodobka 7-aad
### Magaacaabista iyo Dhismaha Waaxda

Madaxda waaxda waxa soo jeedinaya Wasiirka wasaarada ganacsiga iyo warshadaha waxaana magacaabaya Madaxweynaha, waxayna ka koobnaan doonan todoba xubnood oo labo Wasaaradda ganacsigu soo xulayso iyo shan xubnood oo ay u soo gudbinayaan Wasiirka Ganacsiga, wasaaradaha Beeraha, Xannaanada Xoolaha, Caafimaadka, Hawlaha guud iyo kaluumaysiga.

### Qodobka 8-aad
### Xilka, Waajibaadka iyo Awoodaha Waaxda (Department)

Waaxdu si ay u fuliso xilka iyo waajibaadka saaran waxay awood u leedahay inay:

1. Baarto dhamaan anfaca, agabka, alaabta iyo ashyaada soo gelaya dalka ama lagu sameeyo dalka gudihiisa ama la dhoofinayo
2. Soo saarto go`aamo ay ku joojinayaan isticmaalka alaab ama agab, ama lagu xirayo goob ganacsi.
3. In ay gasho goobaha ganacsi ee ay taalo alaabta ay baarayaan ka dib marka ay si haboon u ogaysiiso mulkiilaha ama cidda haysata goobta ganacsi.
4. In ay bixiso shahaadada tayo dhowrka.
5. In ay kala noqoto hay'adaha ay khuseyso ruqsada ganacsi, ganacsadihii ka hooseeya halbeegga tayo dhowrista.
6. In ay u gudbiso laamaha sharci fulinta cidii ay u aragto inay u geftay xeerka.
7. Go'aanka waaxda ee ku xusan farqadda 2-aad ee qodobkan ama go'aankii kale ee ay soo saarto waaxdu waxa looga caban karaan Madaxda Wasaaradda ganacsiga waxaana looga dacwoon karaa Garsoorka.
8. Inay soo saarto Xeer-nidaamiyayaal, hagayaal iyo habraacyo.
9. In ay qaado talaaboyin kasta oo ay ku xaqiijinayso ujeedoyinkeeda iyada oo dhawraysa Xeerka.
10. Hawlgelinta iyo qaadashada shaqaalaha lagama marman ka u ah xil gudashadeeda iyada oo xeerka la dhawrayo.

**Qodobka 9-aad**
**Shuruudaha Xubinnimada Waaxda**

Qof kasta oo loo magacaabayo xubin waaxda ah waa inuu:

1. Yahay muwaadin reer puntland ah.
2. Leeyahay aqoon heer jaaamacadeed ah oo la xiriirta qaybta loo magacaabayo.
3. Ku sifoobay akhlaaq iyo dadnimo wanaagsan.
4. Aan Maxkamad horteed kaga dhicin xukun ciqaabeed saddexdii sano ee u danbeeyay.
5. Waa in uu maskax ahaan iyo jir ahaanba u caafimaad qabaa.

**Qodobka 10-aad**
**Bannaanaanshaha Xubinimada iyo xilka madaxda waaxyaha**

Xubin kasta oo Gudida dhowrista tayada ka mid ahi waa ay luminaysaa xubinimadeeda hadii ay:

1. Lumiso mid ka mid ah shuruudihii lagu soo xulay markii la magacaabayay.
2. Geeri ku timaado ama ay haleesho caafimaad darro aan u saamixi Karin gudashada xilka, oo ay caddeeyeen guddi dhakhaatiira oo u diiwaan gashan wasaaradda caafimaadka.
3. Is casilaad qoraala u gudbiyo/soo gudbiso wasaarada ganacsiga iyo warshadaha dawladda puntland,
4. Si rasmi ah looga qaado xilka waaxda Dhowrista Tayada badeecadaha Puntland.

**Qodobka 11-aad**

**Agaasimaha waaxda**

Waaxdu waxay yeelanaysaa Agaasime waaxeed la magacaabo

1. Shuruudaha magacaabista Agaasimaha waxaa loo raacayaa qodobka 9-aad
2. Haddii ay bannaanaato jagada Agaasimaha waaxda waxa xilka sii haynaya Agaasimaha Maamulka.

**Qodobka 12-aad**
**Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha waaxda**

Agaasimaha Waaxdu waxa uu leeyahay xilkan iyo waajibaadkan soo socda:

1. Waxa uu gudoominayaa shirarka madax qaybeedyada waaxda.
2. Waxa uu metelayaa kuna hadlaayaa magaca waaxda.
3. Hagidda iyo maamulidda dhamaan howlaha waaxdu u xil saran tahay.
4. Wuxuu dalbanayaa shaqaalaha iyo hawl-wadeenada waaxdu u baahan tahay.
5. Soo jeedinta Magacaabista madaxda xafiisyada Gobollada.

6. Soo jeedinta miisaaniyada waaxdu ku shaqaynayso.
7. Saxeexidda qoraalada iyo shahaadada rasmi ahaan uga baxa xafiiska waaxda.
8. Ku kor joogtaynta madax qaybeedyada iyo hawlqabadkooda
9. Maamulida hawlmaalmeedka waaxda Dhowrista Tayada badeecadaha Puntland
10. Hawlgelinta shaqaalaha xafiisyada waaxda iyo ku kormeeridda howl-maalmeedkooda.
11. Isku-xirka hawlaha xafiisyada waaxda xarun gobol ilaa degmo.
12. Soo diyaarinta war-bixinaha hawl-qabad ee xafiisyada waaxda ee xiliyaysan sida ( Bil, saddex bilood, sanad).
13. Dhaqan galinta iyo fulinta awaamiirta iyo go'aamada ka soo baxa Wasaaradda.
14. Raacidda tilmaamaha madaxda qaybaha Dhowrista Tayada badeecadaha Puntland .
15. U soo gudbinta amaanta iyo dhaliilida madax qeybeedyada iyo shaqaadalaha kale Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga
16. Wuxuu isugu yeeri karaa Madax-qeybeedyada iyo shaqaalaha kale ee waaxda markii loo baahdo

## Qodobka 13-ad
## Warbixinaha waaxda

1. Waaxdu waxay 6-bilood kasta dhammaadkeeda soo saaraysaa warbixin faah-faahsan oo ay gudbinayaan wasaarada ganacsiga iyo wasaaradaha kale. Warbixintaasi waa inay ka koobantahay dhamaan waxyaabaha u qabsoomay iyo qiimaynta inta horumar laga gaaray qorshayaashii qayb walba ee waaxda ka tirsani u xilsaarnayd.
2. Waxay waaxdu wasaarada u gudbinaysaa warbixin mar kasta oo kale oo uu wasiirku soo dalbato xisaab iyo xogmaaliyadeed

## Qodobka 14-aad

### Maaliyadda Waaxda Dhawridda Tayada Badeecadaha

1. Maaliyadda waaxda Dhawridda tayada badeecadaha waxa ay ka imanaysaa khidmad looga qoondeeyo inay ka qaadaan alaabooyinka ay baarayaan kuwa soo degaya iyo kuwa la dhoofinayo, waxaana lagu qeexi doona xeer gaar ah.
2. Kicinta iyo hawlgelinta waaxda waxaa mas'uul ka ah Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo wershadaha, isagoo la kaashanaya Wasaaradaha wada shaqeynta la leh iyo ciddii kale ee looga maarmi waayo.

## Qodobka 15-aad

### Xisaabaadka waaxda Dhawridda Tayada Badeecadaha

Waaxda Dhawridda Tayada badeecadaha waxay joogtayn doontaa oo ay si sugan u diiwaangelin doontaa dhammaan dhaqdhaqaaqa xisaabaha soo gala, hawlaha lagu qabtay iyo hantida, agabka ama saabaanka qaybaha waaxdu ka kooban tahay.

## QAYBTA LABAAD

## XUBINTA 1AAD

## HEER TAYEEDYADA BADEECADHA

### Qodobka 16-aad
### Ujeedada Dhawridda Tayada

1) Dhawridda Tayada waxa u bartilmaameed ah:
   b) Caddaynta in agabka adeeggu waafaqsan yihiin shuruucda u taalla;
   t) In ganacsatada laga gacan siiyo sidii ay u xulan lahaayeen agab iyo adeeg waafaqsan xeerarka;
   j) Kor-u-qaadidda tartan-galka tayaysan ee agabka iyo adeegyada heer qaran iyo heer caalamiba;
   x) Abuuridda jawi ay si xor ah agabka iyo adeegyadu isaga gudbi karaan Puntland iyo suuqyada caalamiga ahba.

### Qodobka 17-aad
### Rasmiyaynta ama Baahinta Heer-Tayeed

1) Waaxda dhawrida Tayada waxay ku baahin doontaa Faafinta Rasmiga ah heer-tayeed loo asteeyey agab, wax-soo-saar, wershadayn, wax-soo-saar socda, ama qaabayn, tayo agab, rakibaad, dhismo, tijaabin, hawlgal, adeegsi agab ama Aalad laga istimaali doonno Puntland.
2) Waaxda dhawrida tayadu waxay wax-ka-beddel ku samayn kartaa ama ay meeshaba ka saari karaa heer-tayeed (hore loo faafiyey). waaxdu, ka hor inta aanay si rasmi ah u baahin, waxa ay hubin doontaa in heer-tayeed la dhaqangelinayo ama wax laga bedelayaa waafaqsan yahay tilmaamaha qaranka uga yaallaa samaynta iyo astaynta tilmaamaha heer-tayeedyada rasmiga ah ee uu oggol yahay qaybaha waaxda Dhawridda Tayada; iyo in tixgelintooda la mariyey wax-soo-saarayaasha, qaybiyeyaasha agabka iyo macaamiisha isticmaali doonta agabkaas ama shaygaas.

### Qodobka 18-aad
### Astaamaynta Heerarka

1) Waaxda dhawrida tayada waxay si rasmi ah ugu baahinaysaa Faafinta rasmiga ah ee qaranka astaamaha heer tayeedka, waanay baddeli kartaa.
2) Astaamaha heer tayeedku waxa ay ka baadi-soocayaan agabka iyo dhaqangalka hawl-socod ee waafaqsan sharciga kuwa aan waafaqsanayn.
3) Waaxda Dhawridda Tayadu waxa ay u oggolaan kartaa, iyada oo shuruudaha ku habboon ku lifaaqaysa, in qof/shirkad isticmaasho astaamaynta heer-tayeedka, haddiiba agabkaasi si buuxda u waafqsan yahay tilmaamaha sharciyeed ee u yaalla.
4) Codsi ah in la isticmaalo astaamaynta waxa loogu soo gudbinayaa waaxda Dhawridda Tayada qoraal, iyada oo codsaduhu soo raacinayo tafaasiisha agabka ama hab-dhaqanka uu u doonayo astaamaha;

5) Qofnaba ma codsan karo astaamaha heer tayeedka ee ku xusan qaybtan marka laga reebo agab kasta oo ogolaansho ka haysta Waaxda Dhowridda Tayada iyo agabka fuliya heer tayeedka Puntland.

6) Qof kasta oo:

b) Soo codsada astaanta heer tayeedka galka agabka ama astaan kasta oo lagu dhajiyo agabka.
t) Ku dul sameeya ama ku wareejiya qafas ama weel, uu ku dhex jiro agab, ay ka muuqdaan astaamaha heer-tayeed, ama weel ama qafas si uun loogu muujiyey astaamaha heer-tayeedka; waxa loo aqoonsan doonaa in si buuxda loogu dhaqangeliyey astaamaynta heer-tayeedka agabka lagu muujiyey.

7) Waaxda Dhawridda Tayadu marka ay ku qanacdo in sitaha oggolaanshuhu;

b) Aanu buuxin shuruudaha lagu tilmaamay Xeerkan.

t) Aanu soo saarin ama keenin agabkii oggolaanshuhu ku salaysnaa ee waafqsanaa astaamaynta iyo heer-tayeedka Puntland ee loo asteeyey.

x) Joojiyey soosaaridda ama soodejinta agabka Oggolaanshuhu ku salaysnaa, Waxay joojin doontaa, ama hakin doontaa hawl-socodka ama dhaqangelinta oggolaanshaha muddo aan ka badnayn hal sanno, sida ay madaxda waaxda Dhawridda Tayadu hadba u gaarto.

8) Qodobbada uu xeerkani koobsanayo waxa ay xoojinayaan, oo aanay marnaba hoos u dhigayn, awoodda lagu maxkamadayn karo darjiir lagu sameeyey ama dembi laga galay agabka iyo adeegyada loo cuskanayo. Haddii lagu qanci waayo go'aanka Waaxda Dhawridda Tayada badeecadaha, waxaa loo gudbin karaa Wasiirka iyo Madaxda Wasaaradda Ganacsiga.

## XUBINTA 2AAD

### Qodobka 19-aad
### Diiwaanka Heer-Tayeedyada Puntland

1. Waaxda Dhawridda Tayadu waxay samayn doontaa diiwaan ay ku dhan yihiin heerarka Tayada iyo wixii dukumenti ama sharciyo ah ee la xiriira.
2. Diiwaanku waxa u ahaan doonaa mid bulshadu ku heli karto qaabka ama qaababka (Daabacaadeed) uu u qoondeeyo xafiiska waaxdu.
3. Diiwaanka waxa ku jiri doona: a. Cinwaanka iyo tirsiga heer-tayeedka ama wareegtada/sharciga la xiriira b. Soo-koobid tilmaamaysa inta uu ka koobanyahay heer-tayeedku ama xeerka/sharciga/wareegtada la xiriira.
4. Waaxda Dhawridda Tayadu waxay ku hayn dontaa heer-tayeedyada hab-danabaysan (electronic) si loo ilaaliyo dhawrsoonaanta dukumentiga iyo sharcinimadooda.
5. Waaxdu waxay awood u leedahay inay wax ka beddesho ama ka saarto heer-tayeed diiwaanka. Ogeysiinta heer-tayeed cusub waxa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka

## Qodobka 20-aad
## Ku-Dhawaaqidda, Faafinta iyo Hirgelinta Waajibka ah ee Heer-Tayeed

1. Waaxda Dhawrida Tayadu waxay waajib kaga dhigi kartaa dalka oo dhan heer-tayeed ama qaybo ka mid ah marka ay madaxda waaxdu u garato in waajibintaasi lagama maarmaan u tahay dhaqangelin sharciyeed ee farsamo.
2. Marka ay waaxdu ku dhawaaqdo in heer-tayeed yahay mid waajib ah, waxay uga gol leedahay:

b) Ka-hortegidda dhaqannada been-abuurka iyo khiyaamadu ku jirto
t) Ilaalinta caafimaadka bini-aadamka iyo badbaadadiisa
j) Badbaadinta nolosha iyo caafimaadka noolaha kale sida xayawaanka iyo dhirta; iyo
x) Ilaalinta deegaanka.

3. Waaxda Dhawridda Tayadu waxa ay dib ula noqon kartaa heer-tayeed ay hore u waajibisey.
4. Waaxda Dhawridda Tayadu waxa ay heer tayo ka dhigi doontaa waajib iyada oo hubineysa in:

b) Mushkiladda la xallinayaa tahay mid sugan oo muuqata. (BTJ)
t) Soo-dhexgelidda dawladdu tahay mid lagama maarmaan ah;
j) Si kale looga gun gaari Karin hadafka laga leeyahay heer-tayeedka iyada oo waajib aan laga leexleexan Karin laga dhigo mooyaane;
x) Sharcigii la xiriirey dhaqangal yahay;
kh) Ogeysiin ku habboon oo hore loo gaarsiiyey Hay'adda Ganacsiga Caalamiga ah (WTO);

5. Ogeysiinta ama ku-dhawaaqidda heer- tayeed loogaga dhigayo mid waajib ah waxa lagu soo saaraya ama lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka iyo ugu yaraan mid kamid ah wargeysyada heer qaran ee dalka, iyada oo si cad loogu caddaynayo inuu heer-tayeedkaasi yahay mid waajib ah iyo taariikhda uu dhaqangal noqonayo.
6. Ogeysiinta waa in laga helaa:

b) Magaca iyo lambarka/tirsiga heer-tayeedka
t) Sababta looga dhigay heer-tayeed waajib ah
J) Tilmaanta muujinaysa meesha laga heli karo ama laga dheehan karo diwaanka tafaasiisha dhammaystiran leh ee Waaxda Dhawridda Tayada;
x) Marjaca ama tilmaanta sharciyadda loo cuskaday waajib-ka-yeelista heer-tayeedka si waafaqsan xeerkan;
kh) Oggolaanshaha in ciddii diidan waajibinta heer-tayeedka ugu soo gudbin karto Waaxda Dhawridda Tayada diidmadeeda oo qoraal ah muddo soddon maalmood gudahood ah, iyada oo qaabka gudbinta loogu faahfaahin doono ogeysiinta.

7. Marka uu go'aanka ku-dhawaaqidda Waajibinta heer-tayeed qaato, Waaxda Dhawridda Tayadu waxay ku daabici doontaa Faafinta Rasmiga ah.
8. Ogeysiinta lagu baahinayo Faafinta Rasmiga ah, waa in laga helaa:

b) Magaca iyo tirsiga heer-tayeedka waajibka laga dhigay.
t) Wakhtiga loo qoondeeyey inuu noqdo dhaqangal

**Qodobka 21-aad**
**Dhawrsoonaanta Sharci ee Dukumentiga Waaxda Dhawrida Tayada**

1. Heerarka Tayo ee Puntland waxa ay sharci ahaan u dhawrsoon yihiin Waaxda Dhawridda Tayada
2. Qofna ma daabici karo, dib uma faafin karo, ma kaydin karo, mana baahin karo heer-tayeedyada Puntland iyada oo aan oggolaansho rasmi ah laga helin Waaxda Dhawridda Tayada marka laga reebo in qofku si gaar ah ama cilmi-baaris u adeegsanayo.

**Qodobka 22-aad**
**Heer-tayeedyada iska hor-imanaya iyo sharciyada farsamo**

1. Haddii ay iska hor yimaaddaan tafaasiisha heer-tayeed iyo sharci farsamo, waxa la raacaya sharciga farsamo ee ka horreeyey ee si waafi ah u qeexaya khataraha ku gedaaman dhaqangelinta heer-tayeedka.
2. Haddii iska hor imaad ka dhex muuqdo heer-tayeed waajib laga yeelay oo Xeerkan waafaqsan iyo sharci kale oo si caadi uga dhigaya mid aan waajib ahayn, waxa la raacaya sharcigan adkaynaya waajibintiisa.

**XUBINTA 3AAD**
**CABIRAADA**

**Qodobka 23-aad**
**Ujeedada Cabbiraadda**

Ujeedada Cabbiraadda/Cabbirka laga leeyahay waxa ka mid ah:

1. In la hubiyo is-waafajinta raadraaca cabbiraadeed ee qaranka iyo unugyada cabbiraadeed ee caalamku isticmaalo (international system of units).
2. Inay noqoto cabbiraadda qaranku ka tilmaan qaato, isla markaana xiriirisa habka cabbiraadeed ee caalamka.
3. In la xoojiyo, korna loo qaado habka cabbiraadeed ee heer qaran ee taageeraya ama waxtarka u leh qorshaha horumarinta dhaqaaalaha iyo bulshada ee qaranka, lana jaanqaadsan hababka iyo dhaqannada caalamku isticmaalo.
4. In la hubiyo kalsoonida lagu qabi karo cabbiraadaha ee dhinaca ganacsiga, wershadaha, caafimaadka, nabadgelyada, ilaalinta deegaanka iyo dhaqangelinta *Xeerka* si waxtar looga geysto horumarinta dhaqaalaha iyo bulshada iyo ilaalinta danaha/rabitaanka macaamiisha.
5. In la dhiirrigeliyo cilmibaarista iyo horumarintaa cabbiraadda si loo kordhiyo fursadaha hay'aduhu ka heli karaan ama ka qaadan karaan isu-warwareejinta tiknoolajiga iyaga oo adeegsanaya cabbiraadaha.

**Qodobka 24-aad**
**Mabaadii'da Cabbiraadaha**

1. Barnaamijyada cabbiraadaha iyo hawlaha la xiriira waxa lagu hirgelinayaa iyaga oo ku qotoma mabaadii'da hoos ka muuqda:

b) Cabbiraado hore loo adeegsaday oo tijaabo baxay.
t) In lagu gaari karo qiyaaso tayo leh oo kharajkooda iyo adeeggooda cabbiraadeed la maarayn karo.
j) In lagu gaari karo, oo aanay kala go'nayn, cabbiraadaha la midka ah ee heer caalami iyo wurarka ama macluumaadka la xiriira.

## XUBINTA 4AAD

## BAARAYAASHA

### Qodobka 25-aad
### Magacaabidda Baarayaasha

1) Agaasimaha waaxda Dhawrida Tayada badeecaduhu wuxuu magacabidooda iyo xil ka qaadistooda u soo gudbinayaa Wasiirka Wasaarada ganacsiga tiro baarayaal ah.
b) Baare kasta wuxuu xilkaa kula wareegi doonaa shuruudaha iyo tilmaamaha shaqo ee uu siiyo Xeerka dhowrista tayada Badeecadaha Puntland.
t) Baare kasta wuxuu ku hawlgeli doonaa awoodaha uu siiyo Xeerkani;
2) Agaasimuhu waxa uu la noqonashada u soo jeedinayaa Wasiirka, magacaabid baare ama barayaal lagu igmaday si waafaqsan qaybtan Xeerka;

### Qodobka 26-aad
### Waajibaadka Baarayaasha

1) Inta ay baarayaashu xilgudashadooda uu oggolyahay Xeerkani, waxa ay:
   b) Ay tusayaan dadka hawshu soo gashay dukumentiga aqoonsigooda caddaynaya mas'uuliyadooda.
   t) Ogeysiinayaa mas'uulka goobta agabka ama walxaha laga qaaday goobta iyo sababta loo qaaday, iyaga oo haddii laga codsado bixinaya risiid caddaynaya agabka goobta laga qaaday.
   j) Ogeysiis qoraal ku siinayaan mulkiilaha wixii agab ah ee laga qaaday goobtiisa maqnaanshihiisa.
2) Baaruhu waa in uu goobjoog ahaadaa marka weel afka ka xiran oo lingaxan laga jarayo.

### Qodobka 27-aad
### Awoodaha Baarayaasha

1) Baare lagu magacaabay si waafqsan sharciga waxa uu u gudanayaa hawlihiisa baariseed sida uu u tilmaamo Xeerka Dhawridda Tayada Badeecadaha PL, waxana uu, gaar ahaan, hubinayaa in agabka, hawlgallada iyo badeecaduhu waafaqsan yihiin heer-tayeedyada, cabbiraadaha iyo sharciyada farsamo ee loo dejiyey, iyaga oo baaraya wixii ama khidmad ah ee la xiriira.
2) Si loo fuliyo Xeerkan, Qof baare ah.:

b) Waxa uu, iyada oo uu haysto sababayn ku filan, baaris u geli karaa goob loo tuhunsan yahay in lagu wershadaynayo, lagu soo saarayo, lagu habaynayo agab – amaba lagu samayn karo intaas oo dhan,amaba loogu kaydinayey si looga ganacsado qaab aan sharciga waafaqsanayn.
t) Waxa uu baari karaa, muunadna ka qaadi karaa walax kasta oo loo tuhmo in lagu wershadayn karo, lagu badin karo, lagu qaabayn ama habayn karo agab, iyada oo uu awood u leeyahay in loo furo goobtaas ama walxaha dhexyaalla ee loo isticmaali karo hawlaha tuhunka keenay.

j) Waxa uu baari karaa oo qoraallo ka samaysan karaa qaabayn, wershadayn, ama samayn agab oo socota.

x) Waxa uu baari karaa hawlgal ama hawlfulin isla goobtaas ka socota oo la xiriira ama lala xiriirin karo tuhunka baaristu ku salaysan tahay.

Kh) Waxa uu qaadi karaa tallaabada ku habboon ee lagu joojinayo wershadaynta, soosaaridda, qaabaynta, iwm. Agabka ee sharciga baalmarsan ee aan waafaqsanayn heer-tayeedyada waajibka ah ee qaranka iyo shuruucda farsamo ee la xiriira, si aan badeecadda noocaas ahi u gelin suuqa.

d) Waxa uu ka dalbi karaa qofkii ay soo gasho hawshu inuu soo saaro ama keeno wixii xog diwaan/qoraal ah ee la xiriira hawlgalku badeecadda ama agabka ama qaabaynta uu ku wajahan yahay.

r) Waxa uu baari karaa oo nuqul ama sawir ka qaadan karaa diwaan/qoraal uu u arko inuu wax ka tari karo ama ka iftiimin karo hawlgalka uu ku jiro, iyada oo uu isla mar ahaantaa wixii faahfaahin ah ka dalban karo mas'uulka goobta jooga oo uu ka qaadan karo wixii diwaanka xogta ah ee daruuri u ah baaristiisa iyo go'aannadiisaba.

s) Waxa uu xog dheeraad ah ka raadin karaa qof kasta oo uu u tuhmo inuu wax kaga soo kordhin karo baaristaas oo ku sugan ama ka shaqeeyey goobta, ama qof kasta oo loo tuhmo inuu hayo agab ama walxo caddayn dheeraad ah u ah baarista;

3) Baaruhu :

Waxa uu gacanta ku dhigi karaa ama soo xerayn karaa, si loo soo baaro, badeecad ama agab kasta oo uu u tuhmo in fal garab marsan sharciga lagu galay;

Waxa uu gacanta ku dhig karaa ama qaadi karaa agab iyo diwaanka/qoraalka uu baaruhu u arko inay wax ka tari karaan marag-furka qaab, agab ama hab lala baalmaray sharciyadda ku cad Xeerkan.

4) Marka uu xil-gudashadiisa Xeerkani u oggol yahay gudagelayo waxa uu si cad ugu bandhigayaa aqoonsigiisa baarenimo cidda mas'uulka ka ah goobta baaristu soo gasho, isaga oo mas'uulkaasi kula socodsiinaya inuu la socdo inta uu xilkiisa goobtaas ka gudanayo.

(5) Goobta laga maqan yahay

b) Goobta baaritaanku soo galay aan lagu jirin; ama

t) Mulkiilaha, ku-jiraha ama qofka ka mas'uulka ahi uu si ku-meel-gaar ah uga maqan yahay; ama

J) Gelitaanka goobta la isu diido ama caqabado la hor dhigo; Baaruhu waxa uu ku geli karaa goobta si sharciga waafaqsan, iyada faqradaha (a) iyo (b) la tixgelinayo in:

i. Dedaal iyo tallaabooyin ku habboon uu qaaday Baaruhu inuu helo mulkiilaha, qofka ku jira ama mas'uulka goobta ka hor inta aanu adeegsan awooddiisa;

ii. Uu baadhuhu kaga tago goobta iyada oo ah sidii uu ugu yimi, oo ka xafidan tuugta iyo bililiqada.

## Qodobka 28-aad
## Siraha Ganacsi iyo Ilaalinta Sirta

1. Haddii aan sharcigan si waafaqsan loo adeegsanayn, ama mid kale oo u dhigma, ama iyada oo maxkamadi sidaa dalbato/amarto mooyaane, qofna ama sarkaalna kama war-sheekoon karo badeecad, hawlgal ama wax-soosaar uu kaga war helay inta uu ku dhex jiro xilgudashadiisa

2. Ka warbixinta badeecad, wax-soosaar ama hawlgal waafaqsan xeerkan, waxba uma dhimi karto in loo diiwaan geliyo si sharcigan ama kuwa kale ee u dhigma waafaqsan.
3. Iyada oo la dabbaqayo sharcigan/xeerkan ama kuwa kale ee u dhigma, haddii qof shaqaale ahi bixiyo war la xiriira agab ama badeecad ama wershadayn ama wax-soosaar una sheego baare, uma qoolna loomana qabsan karo sharci ahaan si waafaqsan Qodobka 28-aad, loo-shaqeeyaha ama mas'uulka qofkaa shaqaalaha ahi hoos tagaana kuma ciqaabi karo

## Qodobka 29-aad
## Been-abuurka

1) Ka-been-abuurka badeecaddu waa xaaraan;
2) Waa dembi in la soo dejiyo, la soo saaro, laga ganacsado badeecad been-abuur ah oo aan asal ahayn.
3) Xeerkani waxa uu sidooda u aqoonsanaan doonaa oo dhawri doonaa astaamaha, xuquuqda muuqaal ama qafas ama magac ee badeecadaha ee laga bixiyey dalka dibeddiisa, xataa haddii ayna hore uga diiwaan gashanayn Dalka.

# QAYBTA SADDEXAAD
# DEMBIYADA IYO CIQAABAHA

## Qodobka 30-aad
## Dembiyada iyo Ciqaabaha

1) Qofka kasta oo ay maxkmada horteeda kaga caddato inuu soo-saaray si wershadaysan, soo dejiyey, qaybiyey, iibiyey ama si uun uga ganacsaday dalka gudihiisa badeecad aan waafaqsanayn Heer-Tayeedka la waajibiyey ee Xeerkani jidaynayo, waxa uu mutaysan doonaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn labaatan milyan shiling ama xarig aan dhaafsiisnayn shan sannadood, ama labadaba.
2) Qof kasta oo ay ku caddaato inuu :
b) Is hor taaga ama ka carqaladeeya baare ku hawlgalaya waajibaadka xeerkani faray, qaybtiisa 24.
t) Ka gaabiya ama laga waayo xogta diiwaanka la weydiiyey ama ka jawaab celin waaya weydiimo loo jeediyey oo uu u baahday ama u baahdeen baarayaasha ku qeexan xeerkan iyada oo aanay jirin sabab lagu gudbo oo xeerku oggol yahay, amaba bixiya warbixin ama jawaabo marin-habaabis ah oo runta ka fog;
j) Jebiya ama ka gaabiya inuu ku dhaqmo waajibaadka uu jidaynayo Xeerkani, ama tusaalayaal ama amarro la jaanqaadsan Xeerkan oo la bixiyey, oo ay ahayd in lagu dhaqmo; Waxa loo aqoonsanayaa dembiile wuxuuna mutaysanayaa ganaax aan ka badnayn labatan Milyan oo Somali Shilling ah ama xarig aan ka badnayn shan sannadood ama labadaba.
3) Qof kasta oo ay ku caddaato:
b) Adeegsada ama isticmaala astaamaha heer-tayeedka iyada oo aanu oggolaansho ka haysan Waaxda Dhawridda Tayada, ama ku xad gudubka shuruudaha lagu bixiyo ruqsadda ama oggolaanshaha.
t) Ka been-sheega af iyo qoraal mid kuu doonaba heer-tayeed uu isticmaalay isaga oo uga gol leh inuu ku sheego ama loo qaato inuu waafaqsan yahay heer-tayeed aan laga oggolaan oo uu ku tilmaamayo badeecad, wax-soo-saar, hawlgal, marka aanay dhabtu sidaa ahayn.

J) Si khiyaamo ah qoraal ama af u barbardhiga heer-tayeed u adeegsaday mid u yaalla Waaxda Dhawridda Tayada oo la xiriira badeecad ama soo-saarideeda, iwm. Isaga oo aan oggolaansho ka haysan Waaxda. Waxa loo aqoonsanayaa inuu yahay dambiile, wuxuuna mutaysanayaa xarigg ka badnayn shan sannadood ama ganaax aan dhaafsanayn toban milyan oo Shilin Somali ah.

4) Baare isagoo fulinayaa xilgudashadiisa uu waajibiyey Xeerkani:

b) Gacanta ku dhiga ama xanniba agab aan ahayn kan uu jideeyey xeerkan ama shuruuc kale oo ka dambaysa iyo tilmaamo la xiriira.

t) Lagu helo inuu hanti ka qaatay gudashada waajibkiisa ama abaalmarinno nooc kastaba ha ahaadeene, ballan qaada ama damaanad dhaqaale, oo ka baxsan tan sharcigu u oggol yahay.

j) La gala heshiis uu kaga gaabinayo gudashada waajibkiisa isaga oo qarinaya ama oggolaanaya in laga fakado ama la majara-habaabiyo qaybo ka mid ah Xeerkan ama habsami-u-fulinta waajibaadka baaraha ee goobta.

x) Bixiya xog aanay ku waajibin gudashada waajibaadkiisa ama marag-fur maxkamadeed ama oggolaanshaha Agaasimaha Waaxda oo la xiriira shakhsiyaad ama shirkado;

kh) U adeegsada xilkiisa iyo mas'uuliyaddiisa si uu hanti ugu urursado;
waxa loo aqoonsan doonaa dembiile, wuxuuna mutaysanayaa xarig aan ka badnayn shan sannadood (5) ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn toban malyuun oo Shilin Somali ah ama labadaba oo ay maxkamad garsoor soo saari doonto; iyada oo xukuumaddu la wareegi doonto wixii hanti ah ee lagu urursaday dembiga la galay hadduu yahay lacag, hanti ma-guuraan ah ama mid kaleba.

5) Qof kasta oo ay ku caddaato isagoo u barceraya khiyaamaynta Waaxda Dhawridda Tayada:

b) Siiya si toos ah ama si dadban Baare gudanaya waajibaadkiisa abaalmarin dhaqaale ama mid kale, ama u ballan qaada intaba;

t) La gala heshiis ama afgarad lagu daba-martaynayo Waaxda Dhawridda Tayada iyo shuruucda la hirgelinayo si loo qariyo xog jirta ama loo oggolaado waxa aan sharcigu bannayn oo ku liddi ah xil-gudashada baaraha;
Waxa loo aqoonsanayaa oo lagu qaadayaa inuu galay dembi ciqaabtiisu aanay ka badnayn shan sannadood ama ganaax lacageed oo aan ka badnayn toban malyuun oo Shilin Somali ah – ama labadaba.

6) Qof kasta oo xayaysiis agab ama badeecad oo uu kaga been-sheegayo daabaca, waxa loo aqoonsan doonaa qof galay dembi.

7) Qof kasta oo meeshii lagu ogaa ka qaada, fogeeya ama iibiya, dib u dhoofiya, baabiya ama wax ka bedela badeecad baaris ku jirtey, ka hor inta aan go'aan ka soo bixin, waxa loo aqoonsanayaa dembiile.

8) Qofka lagu helo in uu galay dembi uu qeexay xeerkan, oo maxkamadi ku fulisey, ka sokow ciqaabta hore ee maxkamaddu saartay, waxa amar lagu bixin karaa.

b) La-wareegidda agabka iyo badeecadda lagu galay dembiga, ama baabi'intiisa iyada oo wixii kharaj ah ee ay hawlgalku la yimaaddo la saarayo dembi-galaha.

t) Mamnuucidda soo-saaridda ama iibinta agabka ama badeecadaha aan la jaanqaadsanayn heer-tayeedyada Puntland, iyada oo maxkamaddu amri karto in qalabka, agabka, ama badeecaddaa ku xusan faqradda (b) loogu talin karo hadba sida lagu caddeeyo amarkaa.

## Qodobka 31-aad:
## Marag-furka Shahaadada

1) Shahaadad ama ruqsad caddayn ah oo rasmi ah oo hore loo bixiyey waa loo adeegsan karaa marag-fur maxkamadda horteeda ah oo la xiriira mawduuca ay ku salaysan tahay.
2) Shahaadad ama Caddayn lagu helay siyaabaha uu oggolyahay sharcigani looma adeegsan karo markhaati ahaan haddii aan
b) Cidda marag fur ahaan loogu adeegsanayo aan nuqul loo sii hor marin muddo aan ka yarayn todoba maalmood ka hor dhegeysiga dacwadda.
t) Qofka bixinaya shahaadada ama caddaynta ugu yaraan saddex maalmood ka hor maxkamadda la sii ogeysiin inuu ku yimaaddo Maxkamadda.

Si ay u fulaan waajibaadka sharciyadda qaybtani, caddayn ama shahaado sidaa loo hor keenay maxkamadda, waxa loo aqoonsanayaa sharcinimadeeda haddii aan la caddayn inaanay sidaa ku bannaanayn

## Qodobka 32-aad

## Dabarka Dacwadaha

Xubnaha Waaxda Dhawrida Tayada Shakhsi ahaan looma raacayo lumid ama khasaare kasta oo gaaray dhinac saddexaad (Third Party) oo ka dhasha xil gudashadiisa, haddii lumid ama khasaarahaasi loo gelin si bareer ah, taxadar la'aan ah ama khilaafid Xeerarka iyo talooyinka Mas'uuliyiinta.

# QAYBTA AFRAAD

# QODOBO KALA DUWAN

## Qodobka 33-aad:
## Ilaalinta Dawladda, Waaxda Dhawridda Tayada iyo Hawlwadeenka

In la sheegto in badeecad ama agab uu waafaqsan yahay heer-tayeed qaran, ama sidaa lagu soo wershadeeyey ama in astaan heer-tayeed loogu adeegsaday badeecad si waafaqsan shuruucda. oo la caddeeyey in aanay dhab ahayn, uma qoolna, lagumana dacwayn karo dawladda, Waaxda Dhawridda Tayada, ama mid ama qayb ka mid ah shaqaalaheeda.

## Qodobka 34-aad:
## Cayimidda Shaybaar Qaran

1) Waaxda Dhawridda Tayadu waxay waajib sharci ah u leedahay inay cayinto ama magacawdo shaybaar Qaran oo lagu baaro badeecadaha.
2) Waaxda Dhawridda Tayadu waxay qaadi doontaa kharash adeeg shaybaar lagu socodsiiyo hawlmaalmeedka shaybaarka qaran.
3) Agaasimaha Waaxda Dhawridda Tayadu waxa uu soo saari doonaa siyaasad lagu dhaqo kharashka adeeg shaybaar asagoo xog ka qaadanaya qaybaha kala duwan ee waaxda.

4) Kharashka laga qaadayo adeegga shaybaar waxa uu waafaqsanaan doonaa tilmaamaha wasaaradaha ay qusayso iyo heer maaliyadeedka Puntland.
5) Shaybaarada dalka ka hirgala waxa kormeer iyo dulmar ku leh Waaxda Dhawridda Tayada si ay ugu ilaaliyaan Tilmaamaha heer-tayeedyada Puntland.

**Qodobka 35-aad**
**Reebannaanta Ciqaabidda ama Dulmiga Shaqaalaha**

1) Loo-shaqeeyuhu iskama eryi karo, mushaharkiisa/gunnadiisa ma dhimi karo iyo qodobbada ay ku qotomaan ee lagu meeleeyey isaga oo u soo dejinaya kuwa ka liita halkii at taagnaayeen; sidoo kalena hoos uma dhigi karo heerka mas'uuliyadeed ee uu hayo, ama uma beddeli karo mid ka liita iyada oo loo-shaqeeyuhu ku ciqaabayo hawlwadeenka tuhun uu ka qabo inuu ka war sheekooday shaqada ama uu xog siiyey Baare, isaga oo waajib qaran oo sharcigu ku jideeyey gudanaya.
2) Loo-shaqeeye fulin waaya sida uu dhigayo Xeerkan, qodobkiisa 35 (1), haddii ay ku cadaato waxa loo aqoonsanayaa inuu dembi galay.

**Qodobka 36-aad:**
**Soo saarista Xeer-nidaamiyayaal**

1) Agaasimuhu, isaga oo la kaashanaya wasaarada Ganacsiga, waxa uu soo saari karaa Xeer-nidaamiyayaal lagu sii hagaajinayo habsami-u-socodka xilgudashada lagu tilmaamay Xeerkan.
2) Iyada oo aan waxba laga beddelayn sida guud ee faqrad 1 (sare) u dhigan tahay, waxa uu Agaasimuhu
b) Tilmaamo/Wareegto ka soo saari karaa qaabka ganaaxa iyo kharashiyaadka loo bixinayo oo waafaqsan qodobbada Xeerkan.
t) Qaabayn karaa foomamka loo adeegsan doono hawlgallada kala geddisan ee Xeerkani waajib yeelayo;
j) U qiil dooni doonaa qaabka loo waajahayo ama looga go'aan qaadanayo rafcaannada ka soo ifbaxa dhaqangelinta hawlgallada Xeerkan;
x) Qaab looga lib keeno u samayn doonaa xog-raadinta laga rabo dadka ee daruuriga u ah fulinta hawlgallada Xeerkan;
Kh) Qaabeeyo ama tilmaamo hawl kasta oo lagu meelmarinayo Xeerkan iyo dhabbaha uu u marayo Waaxda Dhawridda Tayadu hawl fulintiisa uu waajibiyey Xeerkani.

**Qodobka 37-aad:**
**Burin**

Waxaa la buriyey Xeer kasta oo ka horimanaya ama aan la socon Karin Xeerkan.

**Qodobka 38-aad:**
**Dhaqangal**

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha DPL Saxiixo, lguna soo saaro Faafinta Kasmiga ah.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**